

Deeqda Kuleejka Washington

Dabagal riyooyinkaaga!

Laga bilaabo 2020-ka, inbadan oo ka mid ah dadka deggan Washington ayaa awoodi doono inay kuleej lacag yar ku dhigtaan. Inbadanna, si bilaash ah ayey ku dhigan doonaan. Deeqda Kuleejka Washington, oo horay loogu magacaabi jiray Deeqda Baahiyaha Gobolka, waa damaanad taasoo ardayda dakhliga qoyskooda uu gaaray heerkii ay ku heli lahaayeen gargaar dhaqaale ay ku heli doonaan lacag dhameystiran si ay isaga bixiyaan waxbarashada haddii ay qorsheynayaan inay dhigtaan iskuulada guud ee gobolka, iyo qeyb ka mid ah lacagta waxbarashada haddii ay dhiganayaan jaamacad ama kuleej gaar ah oo la ansixiyey. Liiska machadyada uqalma: <https://readysetgrad.wa.gov/eligible-institutions>. Sharciga cusub wuxuu ardayda dakhliga qoyskoodu yahay meel dhexaadka siinayaa lacago gargaar oo ka yar. Taasi micnaheedu waxay tahay waxaa kuleej helaayo dad badan oo laga yaabo inaysan uqalmin heerkii hore ee gargaarka dhaqaale.

Uqorsheey mustaqbalkaaga!

Lacagaha waxaa loo adeegsan karaa qeybo kala duwan oo waxbarashada dugsiga sare kadib ah, oo ay ku jirto fasalo labo iyo afar sano ah iyo fasalo farsamo iyo ganacsi, iyo sidoo kale barnaamijyada tababarka xirfadaha.

Deeqda Kuleejka Washington waa deeq, ee ma ahan deyn, sidaa darteed lagaaga ma baahna inaad dib isaga bixiso.

Deeqda waxaad ku dari kartaa deeq kale oo aad ka hesho dowladda iyo gobolka si aad ugu adeegsato qeyb muhiim ah oo dhammaan kharashaadka waxbarashada la xiriira, ma ahan kaliya lacagta waxbarashada.

Wax badan sii ogoow

- Deeqda Kuleejka Washington: <https://wsac.wa.gov/pathways>
- Si aad uhesho deeq, ardayda waa inay buuxiyaan foomka Codsiga Bilaahska ah ee loogu tala galay Gargaarka Ardayga ee Federaalka (FAFSA). Haddii xaaladdaada socdaal ay kuu diideyso inaad buuxiso foomka federaalka, waxaad buuxin kartaa foomka Codsiga Washington ee loogu tala galay Gargaarka Dhaqaale ee Gobolka (WASFA). In la buuxiyo mid ka mid ah labada foom waa tallaabada koowaad ee lagu helayo lacagtaan. Labada foomba waxaa laga heli karaa halkaan <https://wsac.wa.gov/apply>
- Baro sida loo helo caawimaad ku saabsan codsashada kuleej iyo gargaar dhaqaale: <https://readysetgrad.wa.gov/12thyear>

Macluumaaadkaan waxaa bixiyey Ururka Waxbarashada ee Washington, taageeraha ugu muhiimsan ee gobolkeenna ee dhanka iskuulada guud, ardayda iyo bareyaasha. Booqo <https://www.WashingtonEA.org>